Siyaasadda KDB- Diiwaanada Furan/ Kulamada Furan ee Xuquuqda Dadweynuhu ay u leeyihiin in ay Wax Oggaadaan/Xorriyadda Macluumaadka

Sida waafaqsan Qaanuunka Diiwaanada Dadweynaha (Furan) ee Colorado iyo Qaanuunka Kulamada Furan ee Colorado, kulamada ay yeeshaan Guddiga Waxbarashada iyo ficilada uu qaato Guddigu waa arrimo lagu diiwaan geliyo dadweynaha. Intaas waxaa sii dheer, Guddiga Waxbarashada wuxuu caawiyaa xuquuqda ay dadweynahu u leeyihiin in ay hellaan macluumaad ku saabsan barnaamijyada iyo adeegyadaa dugsiyadooda iyo Degmada. Waa siyaasadda Guddigu in uu sameeyo dadaal kasta oo macquul ah si uu u faafiyo macluumaadka khuseysa hawsha dugsiyada kala gadisan, qaybaha, iyo ficilada Guddiga Waxbarashada.

Inkastoo hawlo baddan ay qaabtaan dugsiyadu, hadana Degmadu iyo/ ama Guddiga Waxbarashadu waa kuwo daneeya diiwaan gelida arrimaha dadweynaha, arrimaha muhiimka ahna ma ahan kuwo u hoggaansan daah ka qaadis taasna waxay macnaheedu tahay in ay yihiin kuwo sir ah, ama kashifaadu waxay noqon kartaa mid kasoo horjeeda danaha dadweynahu sida lagu qeexay qaanuunka la dabakhi karo ama siideynta warbixintaasi waxaa lagu mamnuucay qaanuun.

1. Diiwaanada Furan/Kulamada

a. Dhammaan hawlaha Guddigu, go'aanada, diiwaanada lacagta, iyo siyaasadaha lagu qabatamay Guddiga Waxbarashada waxay yihiin arrimo diiwaan gelin dadweyne, hadaba warqad kasta oo qoran oo khuseysa isla arrintaas waxay ahaan doontaa mid la heli karo haddii loo baahdo baaritaan halka lagu haynayo inta lagu guda jiro saacadaha xafiiska u hoggaansan dhugasho macquul ah, haddii kale waa mid loo heli karo si dhakhso ah. Guud ahaan, codsashooyinka lagu rabbo in lagu galo ama lagu helo diiwaanada, Guddigu wuxuu oggolyahay seddax maalin ganacsi waafaqsan qaanuunka si loo aruuriyo warbixinta la codsaday.

b. Si lamid ah, dugsiyada ku yaala Degmada waxay daaha ka qaadi doonaan dhammaan hawlaha, go'aanada dugsiyada ku saleysan, iyo bixinta lacagta la siiyo xubnaha dadweynaha guud, hadii la codsado. Guddiga Waxbarashadu wuxuu ku guubaabinayaa maamule kasta in uu adeegsado dhammaan hababka uu heli karo si loogu wargeliyo waalidiinta iyo kuwa kale ee bulshada ka tirsan waxyaabaha ku saabsan barnaamijyada gooniga ah iyo hawlaha.

c. Dirida fariin elektaroonig ah, ee u hoggaansan hababka lagu cadeeyay Siyaasadda Guddiga Waxbarashadu ee Fariin dirida Elektarooniga ah EGAEA.

d. Guddiga Waxbarashadu wuxuu ogsoonyahay muhiimada ay leedahay xuquuqda dadweynahu ay u leeyihiin in ay oggaadaan waxyaabaha la xariira hawlaha kooxaha Samaynta Go'aanka Wadashaqaynta ee ka jira dugsiyo baddan ee ku yaala Degmada. Dhammaan ficilada rasmiga ah ee ay qaataan CDM wuxuu ahaan doonaa mid ay heli karaan dhamaan xubnaha ka tirsan CDM sidoo kale guud ahaan dadweynaha oo dhan. Kooxda CDMs waxay fulin doonaan nidaam

hawleedyada si loo ilaaliyo diiwaanada kulumada iyo go'aanada waxayna faafin doonaan warbixintaan hadii laga codsado. Hawl kasta oo uu qaato CDM taas oo ku lug leh arrimo shakhsi ah, waxaa lagu xukumi doonaa kuwa aan daaha laga qaadin waxay noqon doonaan kuwo la qariyo sida lagu sheegay halkan kor.

e. Guddiga Waxbarashadu wuxuu u baahanyahay in uu u hoggaansamo Qaanuunka Kulamada Furan ee Colorado sida lagu cadeeyay gudaha lambarkaan C.R.S. 24-6-401, et seq. Inkastoo qaanuunkan uusan ahayn mid lagu dabakha qaybaha ama hay'adaha hoos imaanaya awoodda xukunka Guddiga Waxbarashada, Guddigu wuxuu ku guubaabinayaa dhammaan kooxda CDMs in ay u hoggaansamaan dhuuxda ama murtida Qaanuunka Kulamada Furan.Tixgelinta arrintaan, ogaysiis buuxa oo waqti ku xiran oo ah kulamada CDM oo ay la socoto jadwalka hawlaha furan ah kaas oo dugsi kasta loogu dhejin doono meelo xaddidan. Dhammaan xubnaha CDM waa in lala socodsiiyaa kulanka. Dadweynahana waa in loo yeeraa si ay u yimaadaan kullanka CDM ugana qayb qaataan qaanuunada waafaqsan ee ay shaagteen dadka kalida ah ee ka jira CDM. Kasoo qaybgalka dadweynuhu waa laga reebi doona marka laga hadlayo mawduucyo khuseeya ama arrimo ku saabsan una hoggaansan jumlada 2 ee socota.

2. Diiwaanada Aan Heli karin Dadweynaha

Diiwaanada qaarkood ee ay hayso Degmadu waa kuwo sir ah mana loogu talo gelin in loo sii daayo dadweynaha guud. Diiwaanadan waxaa ku jira, laakiin aan lagu xaddidin daruuri ahaan intan soo socota.

a. Diiwaan kasta iyo dhammaan diiwaanada oo dhan kuwaasi oo la xariira ardayda halka arday kasta lagu aqoonsanayo marka macluumaada la sii daayo.

b. Diiwaanada dadka Degmada taasi oo la xariirta shaqaalaha

intaasi wixii ka ahayn intaan soo socota waa la sii deyn doonaa.

(1) Dalab hore ama hadda ah oo ku saabsan shaqaalaha

(2) Heshiisyada Shaqaalaynta

(3) Magdhow kasta ay ku jirto kharashka gunno iyo faa'idooyin

(4) Heerarka waxqabadka/shaqaalayaasha sirta ah kaliya

(5) Lacag kasta oo la bixiyay ama faa'iido lasiiyay dhacdo si loo dhameeyo howsha shaqada

c. Diiwaano kale oo u baahan qaanuunka dowladda ama midka dowladda dhexe iyo/ama xeerar ama qaraaro maxkameed si ay u ahaato sir iyo/ama aan loogu talo gelin in la faydo.

3. Nidaam hawleedyada

a. Xafiiska Maareeyaha iyo Xafiiska Adeegaha Qaanuunka ayaa lagu wargelin doonaa qaybaha iyo/ ama dugsi qoraal kasta oo rasmi ah ee ku saabsan diiwaanada dadweynaha waafaqsan codsiga la helay ee lambarkan sirta ah C.R.S. §24-72-204, et seq.

b. Inkastoo Guddigu uu ku boorinayo siideynta warbixinta, xaaladaha halka codsiga macluumaada uu yahay mid aad u weyn ama u baahan wakhtiga shaqaalaha si uu u aruuriyo macluumaadda haddii loo baahdo nuqulo la codsado, Guddigu wuxuu qaadanayaa ujro macquul ah oo lagu diyaarinayo nuqulada laakiin lacagta la sheegay kama badna qiimaha dhabta ah. Maareeyaha ayaa hirgelin doona nidaam hawleedyo lagu qiimaynayo qiimaha lacagta nuqulka haddii wax macluumaad ah la codsado.

Tababarka hada ah waxaa la ansixiyay: la lambareeyay1993
La ansixiyay: Abriil 1994
La muraajaceeyay: 16 Agoosto, 2001

TIXRAACA SHARCIGGA.: C.R.S. 22-9-109
C.R.S. 22-32-109 (1)(c)
C.R.S. 24-72-201 et seq.

TIXRAACA KALE EE LA EEGAYO.: BEDG, Daqiiqado
CBIA, Baaritaanka DadwEynaha ee Qiimaynta Maareeyaha
GBJ, Diiwaanada Shakhsiga ah iyo Feelasha
JRA/JRC, Diiwaanada Ardayga/Siideynta Macluumaad ardayda ku saabsan